**Xeer-Sharci, ee 8 Juunyo 1960, lamba. 1/diiw.**

**Baasaboorrada dibeeda lagu gaaro.**

**MAAMULAHA**

Markuu tixgeliyey baahida iyo degdegsiimada loo qabo in loo hawgalo soo/saaridda xeerar nidaamiya bixinta basaboorrada loogu safro dibedda, ee Xukuumadda Soomaaliya;

MARKUU DHEGEYSTAY Golaha Wasiirrada;

AYADA OO LAGU SALEYNAYO SOOJEEDITA Wasiirka Arrimaha Gudaha;

ASAGA OO CUSKANAYA awoodaha uu siinayoQod. 8aad, Amargooyada 5 Jannaayo 1956, lr. 2;

WUXUU XEERAYAA

**Qod. 1**

**Waajibka baasaboorka**

Muwaadanka doonaya in uu gaaro dibedda waa in uu qaataa baasaboor.

Waajibkaas waxaa laga dhaafayaa xoolo raacatada ku khasban in gudbaan (ka tallaabaan) xuduudaha sababo la xiriira daaqa xoolaha iyo kuwa haysta “warqadaha xadka” iyo “dhaafiye”, oo ku xaddadan aagagga (meelaha) ku tilmaamam isla dokumentiyadaas.

**Qod. 2**

**Masuuliinta bixisa baasaboorka**

- Dhulka Dowladda gudahiisa, waxaa bixiya Wasiirka Arrimaha Dibedda;
- Dalka dibeddisa, waxaa bixinaya wakiillada dibolomaasiyiinta ah iyo qunsuliyadaha:

**Qod. 3**

**Nooca baasaboorka**

Baasaboorradu waa saddex nooc:

- caadi;
- adeeg Dowladeed;
- dibolomaasi.

Baasaboorka caadiga ah, marka laga reebo sida ku xusan Qod. 5aad, waxaa la siin karaa, markay codsadaan, dhammaan muwaadiniinta.

Baasaboorka adeegga waxaa la siiyaa xildhibaannada iyo shaqaalaha rayidka ah iyo kuwa millatariga ah ee dibedda u taga hawlgal rasmi ah.

Baasaboorka dibloomaasiga waxaa loo siiyaa Madaxa Qaranka (Madaxweynaha), Wasiiradda iyo Xoghayeyaasha, iyo sidoo kale saraakiisha xirfadaha hoggaamin ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda. Waxaa sidoo kale la siin karaa xildhibaannada dibedda u tagaya howlo diblomaasiyadeed.

**Qod. 4**

**Ansaxnimada baasaboorka**

Ansaxnimada baasaboorka caadiga ahi waxa ay jireysaa muddo saddex sano ah.

Masuuliinta awoodda u leh bixinta  ayaa cusbooneysiin kara muddo taas la mida.

Ansaxnimada baasaboorka adeeggu waxa uu ansax ahaanayaa is muddada ay soconeyso hawsha darteed loo bixiyey.

Ansaxnimada baasaboorka dibloomaasiga ah ee la siinayo xildhibaannada waxa ay ansax ahaanayaan dhammaan waqtiga uu sitihu uu hayo xilka ku tilmaaman faqradda ugu dambeysa, ee Qod. hore.

**Qod. 5**
**Dadka aanan heli karin baasaboorka**

Baasaboorka caadiga ah lama siin karo:

a) kuwa dayacaya (ka tagaya) dadka lagu aaminay daryeelkooda, oo aan uga tegin, si ku habboon, kuwa kale oo ay ku aaminaan;

b) kuwa, ku hoos jira awoodda dadka kale, oo aan ka helin oggolaanshaha qofka ay ku tiirsan yihiin ama haddii la waayo kuwan dambe, hay'adda garsoorka ee awoodda u leh;

c) dadka dhimirka ka jirran;

d) kuwa lay ku socoto dacwad ciqaab ah oo, aan sinnaba u awoodi in ay oggolaansho ka keenaan Hayadda Garsoorka;

c) qof kasta oo galaydambi lid ku ah shakhsiyadda Dowladda.

**Qod. 6**
**Tilmaamaha lagama maarmaanka,eebaasaboorka**

Baasaboorka waa in ay ku yaallan tilmaamaha soo socda:

- faahfaahinta magaca shakhsiga oo dhammeystiran iyo astaamaha sita (haysta);
- Dowladha baasaboorku ansax ku yahay;
- taariikhda la soo saaray iyo tariikhaha wixii cusboonaysiin ah;
- timamaha shaqsiga oo dhameystiran ee shakhsiyaadka loo oggolaaday inay safarka u raacaan qofka sita.

Dadka noocaas ah ma  noqon karaan cidaan ahayn xaaska iyo carruurta yaryar.

Baasaboorka waa inuu dheggan yahay sawirka qofka sita.

**Qod. 7**
**Kala-noqoshada baasaboorka**

Masuuliinta awoodda u leh inay bixiyssn baasaboor lagu tegaayo dibedda waa inay dib ula noqdaan, xitaa haddii uusan dhicin, markay u muuqato in qofka sita (heysta) uusangoortaas ku sugneyn xaaladihii (shuruudihii) looga baahnaa xagga bixinta.

**Qod. 8**
**Joojinta bixinta baasaboorrada**

Wasiirka Arimaha Dibada waxa uu awood u leeyahay, asaga oo dhegeystay Wasiirka arrimaha Gudaha, inuu diidi ama joojiyo (hakiyo) bixinta baasaboorka, amro la-noqoshada (kala-noqoshada) ama xadiddidaadda halka lagu tegayo sababo la xiriira nidaamka guud ama sababo khuseeya  amniga gudaha ama caalamiga ah,ee dowladda.

Waxay uu sidoo kale diidi karaa ama joojin karaa bixinta, markii nolosha, xorriyadda iyo hantida kuwa doonaya inay dalka ka baxaan ay khatar geli karaan.

**Qod. 9**
**Baasaboorro Talyaani oo la siiyey Muwaadiniin Soomaaliyeed**

Baasabooro uu Maamulka Wasaayada Talyaaniga, ee Soomaaliya, siisay muwaaddiniinta Soomaaliyeed oo dhacaya wixii ka dambeeya Juun 30, 1960, waa kuwo ansax ah ilaa dhicitaanka laftiisa, laakiin ugu dambeyn 31-ka Diseembar, 1960, marka laga reebo axkaamta kala duwan oo la soo saari karo kaddib 30ka Juunyo, 1960.

**Qod. 10**
**Xeerarka xagga nidaaminta**

Xukuunmddu waxa ay ku dhaqaaqeysaa in ay soo saarto xeerarka lagama maarmaanka u ah fulinta (hirgelinta) Sharcigan.

**Qod. 11**
**Dhaqangalka**

Xeerkan, oo dhaqangelaya taariikhda nashrinta, ee Faafinta Rasmiga ah, ayaa la horgeynayaa Golaha Xeedejinta (sharci-dejinta) si loogu rogo (beddelo) Sharci, ugu dambayn bilowga kal-fadhiga Golaha Xeedejinta, oo ku xigta taariikhda nashrintiisa. .

Muqdisho, 8da Juunyo 1960.

Maamulaha
Mario Di Stefano

Wasiirka Kowaad
Cabdullaahi Ciise Maxamuud
Waa arkay waana Diiwaangeliyey-
Diiw. lamba. 22 – xaashi, lamba. 168.
Hantidhowraha: Spadaro